

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada.

Hadii aad xanuunsato

Hadii aad xanuunsaneyso, hadii aad dhaawacantey ama hadii aad rabto in aad wax weydiiso waan kugu soo dhaweynaynaa markasta Maamulka Gobolka Kronoberg.

Wac 112 marka ay dagdeg tahey

Wac 112 wixii alaarmka SOS ta ee cudurada ama dhaawacyada nolosha u halista. Alaarmka SOS ta waxa jooga shaqaale habeen iyo maalinba. Waxa ay ku siin doonaan talo xiliga aad sugeyso ambulaanska.

Wac 1177 wixii talooyin daryeelka

Waxa aad wici kartaa talobixinta daryeelka bukaanka habeen iyo maalin. Halkan waxa aad la hadli kartaa qof su'aalahaaga kaaga jawaaba. Waxa aad ogaan kartaa in ay jirto wax aad adigu samey karto iyo in aad u baahan tahey in aad u timaado kalkaaliso, dhakhtar ama qaybta gargaarka dagdega ee cusbitaalka.

Hadii aad maalinta xanuunsato

Rugta caafimaadka waxa jooga shaqaale aqoon iyo xirfad u leh in ay daaweeyaan cudurada intooda badan. Marmarka qaarkood waxa kugu filan talo fiican, xiliyada kalena wakhti dhakhtar ayaa lagu siin.

Hadii aad u baahan tahey daaweyn takhasus ah oo cusbitaalka waxa taa kaa caawin oo kuu diyaarin doona dhakhtarkaaga rugta caafimaadka.

Hadii aad fiidka, habeenka ama xiliyada fasaxa xanuunsato

Wac xarunta dhakhaatiirta heeganka ah hadaad xanuunsato habeenkii ama xiliyada fasaxa, marka ay xidhan tahay rugtaada caafimaadku. Soo wac xunta dhakhaatiirta heeganka ah hadii aad kadis u xanuunsato habeenkii iyo xiliyada fasaxa, marka ay rugtaada caafimaadku xidhan tahey. Wac markasta xarunta dhakhaatiirta heeganka ah ko hor intaanad booqan.

Ljungby – xiliyadey furan tahey: isniin-jimce saacadaha 17-21, sabti-axad saacadaha 8-21 tel: 0372-58 51 00

Växjö- xiliyadey furan tahey: isniin-jimce saacadaha 17-21, sabti-axad saacadaha 8-21, tel: 0470-58 78 00

Is daryeelka

Nolosha fiican (Det goda livet) waxa ay ka hadleysaa caafimadka – in aad fiican tahey. Si loo wacnaado waxa aynu u baahan nahey in aan daryeelno dareenka iyo fikirada ina soo gala iyo sido kale in aan jidhkeena daryeelno. Xidhiidhka dadka kale waa muhiim iyo sido kale awoodeena in aan sameyno doorashooyin fiican. Ugu danbentii waxa ay ku sabsan tahey

Hadii loo baahdo waxaad xaq u leedahay adeega turjumaanka luqadda. Fadlan na soo war gali baahidaada turjumaanka markaad qabsaneyso balantaada. Shaqaalaha daryeelka caafimaadka ayaa kadib kuu diyaarin doona turjumaan ka socda hay'adaha turjumaada. awooda lagu dareemo nafsad iyo qiimo nolosheenu leedahey – sikastoo ay taheyba. Boga Golaha Deegaanka ee internetka ayaa wax dheeraad ah oo Nolosha fiican (Det goda livet) ku sabsan ka sii akhriyi kartaa.

Buuga is daryeelka

Hagaha is daryeelka waxa ku jira talo iyo tusaale waxa uu qofku sameyn karo si uu u dhimo oo una daaweeyo carqaladaha fudud. Buugu waxa kale oo uu ku siineyaa caawimo aad ku ogaato marka aad u baahan tahey in aad la tidhiidho qaybta daryeelka. Waxa aad nuqulkaaga lacag la'aanta ah ka soo qaadan kartaa ilinka dhakhtarka iyo rugaha caafimaadka ee degmada. Waxa kale oo aad ka dalban kartaa boga internetka ee degmada.

Hagaha is daryeelka waxa lagu heli karaa isagoo CD ah iyadoo laga dalban karo telefoonka 0470-58 85 56.

www.1177.se

Bogga [1177.se/Kronoberg](http://www.1177.se/Kronoberg) waxaad ka akhriyi kartaa wax dheeraad ah oo ku sabsan cudurada, baadhitaanada iyo is daryeelka. Halkan waxa kale ood ka heli kartaa warbixinta bukaan socodka, macluumaadka lagala soo xidhiidho, adeega e-services iyo warbixinta Gilaha Deegaanka Kronoberg.